



# Golaha Waxbarashadu Waxay Ansixiyeen Qiimeynta Hawl-gudashada Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero ee Sanad-dugsiyeedka 2020-21

Juun 18, 2021

Tallaadadii la soo dhaafay, Golaha Waxbarashada PPS wuxuu meel mariyey xeerka Res. 6325, xeerkaasi oo lagu qiimeynayey hawl gudashada Guddoomiyaha Waxbarashada sanad-dugsiyeedka 2020-21. Waxaad [ka heli kartaa dukumentiga qiimeynta oo dhammeystiran marka aad halkan gujiso](#).

Qeybo kooban oo ka mid ah faallooyinka Golaha iyo waxyaabihii ugu muhiimsanaa dhammaan waxaad ka heli kartaan linkiga dukemintiga:

*Iyada oo la soo gaaray sanadkiisii afraad ee uu hoggaaminayey iskuulada degmada, waxaan aad ugu faraxsanahay horumarka la taaban karo ee la gaaray marka la eego hoggaaminta Guddoomiye Guerrero ee uu muhiimada siiyey hoggaamin ay ardaydu udub dhexaad u yihiin. Iyada oo arrimo fara badan iyo qorshayaal horumarineed oo la higsanayo ay socdaan, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay xaqiijiyeen sidii ay Degmadeenu u noqon lahayd mid ay u qalanto ardaydeenu....*

*Maamulka Guddoomiyaha Dugsiyada Dadweynaha Portland marka la eego hay'ad ahaan waa mid xoog badan. Mudaddani yar ee uu xilka hayey, waxa uu abuuray ama guud ahaan dib u habeyn ku sameeyey nidaamyadii Degmada ka jiray ee lagama maarmaan ahaa iyada oo ay ka go'an tahay sidii loo sii wadi lahaa joogteynta horumarinta....*

*Hoggaaminta Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero waxaa cad isbedelka horumarka dhinaca manhajka iyo kaabayaasha qaabka wax loo dhigayo ee degmada in uu saldhig uga dhigay in macallinku yahay mishiinkii dhaqaajinayey....*

*Goluhu wuxuu la wadaagayaa rajo fiican oo ku saabsan dadaaladeena ku wajahan isbedelada fursadaha loo siman yahay iyo natiijooyinka ardayda...*

*Dadaallada horumarinta waxa ay salka ku hayaan sinaanta jinsiga iyo cadaalada bulshada iyo waliba shaqaaleyn caalami ah oo diirada lagu saarayo, dariiqo bartilmaameedkeedu yahay caalami ka dibna la beegsanayo istaraatiijiyadaha caalami ah sidii loo horumarin lahaa dhammaan natiijooyinka ardayda, laakiin diirada la saarayo kooxaha aan inta badan heli addeegyadii ay u baahanaayeen. Inkastoo ay tani tahay wali bilow hore, heerarka qalin-jabintu waa ay sii kordhayaan, gaar ahaan inta badan kooxaha ardayda BIPOC (Madow, Ardayda Asalka ah, iyo dadka aan cadaanka ahayn ee loo yaqaano midabka) iyo qeybo ka mid ah xogta qiimeynta oo soo jeedineysa in dadaalada horumarinta ee Degmadu wado ay bilaabayso inay gaarto meeshii loogu*

*talagalay...*

*Marka la eego duruufahani aan caadiga ahayn ee xanuunka faafayey, waxaan aaminsanahay in Guddoomiyaha Waxbarashada iyo kooxda la shaqeysaa ay qabteen shaqo aad u wanaagasan sida ay u tacaaleen caqabadii uu keenay xanuunka COVID, sidii loo ilaalin lahaa bedqabka shaqaalaha iyo ardayda, iyo maareynta dhammaan hawlihii shaqo ee dhammaan la xiriiray dhinaca waxbarashada guryaha lagu qaadanayo iyo dib u furistii waxbarashadii isku-dhafaneyd diirada lagu saarayey sidii loo taageeri lahaa ardaydeena iyo qoysaskeena.*